



Akoonka iskuulaadka iyo Jaamacadaha



Ma tahay maamule ama milkiile iskuul, waalid ilmihisu wax bartaan ama arday midna? Haddii jawaabtu tahay “Haa”, Waxaa la hubaa inaad u baahantahay qaab ku haboon bixinta lacagaha waxbarashada.

MyBank wuxuu kuu diyaariyay system online ah, aadna u fudud oo lacagaha iskuulada/jaamacadaha lagu bixin karo, kaas oo ah mid si toos ah isugu xiraya nidaamka xisaabaadka Iskuulka/jaamacadda iyo MyBank. Tani waxay awood u siineysaa macaamiisheenna inay si toos ah uga wareejiyaan lacagaha akoonadooda, kuna wareejinaya koontada dugsiga/jaamacadda ubadkoodu dhigtaan, iyagoo isticmaalaya habkeenna biilal-bixinta. Tani waxay sidoo kale si otomaatig ah u update garaynaysaa nidaamka xisaabaadka iskuulka/jaamacadda, iyada oo ardaygii lacagta bixiyay ka soo muuqanayo liiska ardayda lacagta bixisay, kana baxayo liiska ardayda aan lacagta weli bixin.

Faa'iidooyinka Akoonkan:

- Jeeg buug ka kooban 100 xaashi.
- Haddii aan iskuulka ama jaamacaddu lahayn system electronic ah oo ay ku maamushaan iskuulka/jaamacadda iyo xisaabdkeeda, waxaan siinaynaa, kuna tababaraynaa system lacag la'aan ah oo ka caawin doona iskuulka/jaamacadda in ay si digital ah u maamulaan iskuulka/jaamacadda isla markaana fee-ga kaga qabtaan ardayda ama waalidkood si online ah.
- POS machine ay macaamiishu ku bixin karaan lacagaha Kolka ay bixinayaan fee-ga jaamacadda.
- Statement ga akoonkaaga oo si bille ah laguugu soo diro si otomatik ah.
- Si sahlan oo lacago lagaaga soo diri karo, isla markaana aad ugu dirsan karto dibedda, adiga oo adeegsanaya adeegga Swift, iyo kannaallada kale ee casriga ah ee lacagaha la isugu diro.
- Si sahlan (Online ah) oo aad isaga bixin karto dhamaan biilasha iyo lacagaha kale ee lagugu soo dallaco hab online ah, sida biyaha, korontada, TV-ga, Kharajaadka laysanka ganacsiga iyo qaybo kale oo badan.
- Amar lacag-bixin joogto ah oo aad hal mar bixin karto, deedna bil ama sitimaan kasta si otomatik ah lacagtii looga wareejinayo akoonkaaga, lana dhigayo akoonka ciddii aad dalbatay in lagu wareejiyo. Lacagaha aad habkan ku wareejin karto waxaa ka mid ah mushaarka macalimiinta iyo shaqaalaha kale iyo kirada guriga iskuulka/jaamacaddu degentahay IWM.

- Internet banking kuu sahlaya in aad akoonkaaga maamulato goor kasta iyo goob kasta oo aad joogto.
- SMS lagugu soo wargelinayo dhamaan transactions-ka ka dhaca akoonkaaga.
- 24-ka saac iyo 7-da maalin ee sitimaanka oo aad si online ah ula sheekaysan karto shaqaalaha bankiga, si ay kaaga caawiyaan wixii cillada, cabasho ama su'aal ah ee aad qabto. Shaqaalaha bankiga waxa aad kula hadli kartaa website-ka bankiga, Facebook iyo WhatsApp.
- Mushaarka shaqaalaha oo aad ku bixin karto si online ah.
- Waxaa lagu samaynayaa qof aad si gooni ah ugala soo xiriirto dhamaan waxyaalaha aad bankiga uga baahato.
- Waxa aad ka faa'iideysan kartaa hababka maalgelinta ee bankiga.

Shuruudaha Furista Akoonkan:

1. Aqoonsiga (National ID ama passport) milkiilayasha/agaasimayaasha iskuulka/jaamacadda.
2. Koobi xeer-hoosaadka lagu aasaasay iskuulka/Jaamacadda.
3. Laysanka iskuulka/jaamacadda.
4. Cinwaanka iskuulka/jaamacaddu.
5. Caddaynta/faahfaahinta nooca ganacsiga.
6. Labo sawir oo nooca passport-ka ah oo laga rabo cid kasta oo akoonka saxiixaysa.
7. Aqoonsiyada (ID, Passport IWM) cidda akoonka saxiixaysa (Haddii ay ka duwanyihiin milkiilayaasha/agaasimayaasha iskuulka/jaamacadda).
8. Warqad codsi ah oo milkiilayaashu/agaasimayaashu u soo qoraan bankiga.



 7777  +252 1 847777 | +252 62 3737777

 +252 61 3737777

 info@mybank.so

 www.mybank.so

  [MyBank.so](https://www.facebook.com/MyBank.so)

 [MyBankso](https://twitter.com/MyBankso)

Head Office / Branch Location
Mogadishu, Somalia



my

